my ENERGY saving home

# Sida loo isticmaalo bamka wax kululeeya



Somali | Soomaali

## Waxa laga filan karaa bamka wax kululeeya

### Biilal raqiis ah waxayna u fiican yihiin jawiga

Nidaamyada bamka ee biyaha kululeeya waa kuwo korontada dhaqaaleeya oo lacag badan kaagama baxeyso si ay kuugu shaqeeyaan. Bamka wax kululeeya wuxuu kuu beekhaamin karaa boqolaal doolar oo biilasha korontada ah sanad kasta.

Waxay sidoo kale soo saaraan waxa loo yaqaan greenhouse gas ka ugu yar marka loo barbardhigo qalabka biyaha kululeeya oo dhan.

### Sida uu u shaqeeyo bamka wax kululeeya

Bamka wax kululeeya wuxuu u shaqeeyaa sida qaboojiyaha, kaliya un dhinaca kale ayaa loo gediyay. Waxay soo nuugaan kulaylka ka imaanaya hawada ku hareeraysan waxayna u gudbiyaan biyaha ku jira haanta wax kululeysa.

### Maxaa dhacaya haddii ay korontadu tagto?

Haddii ay korontada tagto bamka wax kululeeya si otomaatik ah ayuu iskiis isu soo bilaabi doonaa markay korontada soo laabato.

### Calaamadaha ammaanka ee uu leeyahay bamkaaga wax kululeeya

Bamkaga wax kululeeya wuxuu leeyahay qalab saxa qiyaasta heerkulka. Sharciga Victoria ayaa qaba in taas la sameeyo. Qalabkaas loogu talagalay inuu qiyaaso heerkulka wuxuu xaqiijinaya in kuleylka biyaha aysan dhaafin 50 °C si looga hortago gubashada. Waxaa laga yaabaa in bamkii hore ee wax kululeyn jiray aanu lahayn qalabkaas loogu talagalay inuu qiyaaso heerkulka. Hadday sidaas tahay, waxaad dareemi kartaa farqi u dhexeeya heerkulka biyaha.

### Shanqarta uu sameynayo bamka wax kululeeya

Waxaa laga yaabaa inaad dareento in bamka kululeeya uu shanqar sameynayo marka uu shidan yahay, sida qaboojiyaha firinjeerka oo kale. Taasi waa wax iska caadi ah.

### Bamka wax kululeeya markasta ha daarnaado

Bamka wax kululeeya ha daarnaado 24 saacadood, 7 maalmood isbuucii. Taasi waxay xaqiijin doontaa in biyahaagu ay markasta kuleel yihiin si ay uga hortagaan bakteeriyada ka soo baxda bamka wax kululeeya.

homes victoria

VICTORIA State Government

## Maxaa dhacaya haddii ay kaa dhammaadaan biyaha kulul?

Bamka wax kululeeya ee gurigaaga ku xiran waa inuu lahaadaa biyo kulul oo ku filan qoyskaaga. Haddii biyaha kulul kaa dhammaadaan, waxay qaadan kartaa inta u dhaxaysa 3 ilaa 5 saacadood inuu hadana dib u kululeeyo. Taasina waxay ku xiran tahay hawada dibadda iyo heerkulka biyaha meesha soo galaya.

### Waxyaabaha keeni kara inay kaa dhamaadaan biyaha kulul



Qubays muddo dheer soconaya iyo/ama squbeys lagu noqnoqdo



Qubeyska joogtada ah

## Bamka wax kululeeya wuxuu leeyahay qalab 'wax kordhiya' ama 'hybrid' ah oo ku xiran

Isticmaal qalabkaas wax kordhiya (boost) ama hybrid ka si aad si degdeg ah ugu kululeyso biyahaaga:

- xilliga qaboobaha haddii aad ku nooshahay meel baraf leh,
- haddii ay gurigaaga ku nool yihiin in ka badan inta caadiga ah, ama
- haddii ay kaa dhamaadaan biyaha kulul.

Akhri sharaxaada ku qoran mashiinkaaga ee kuu sheegaya sida loo isticmaalo nidaamka wax kordhiya (boost) ama heybrid ka meesha laga isticmaalo.

**!** Isticmaalka aad isticmaalayso nidaamka wax kordhiya (boost) ama hybrid ka waxay kordhin kartaa biilashaada korontada. Laakiin xitaa haddii aad isticmaasho labadaas meelood, bamka wax kululeeya wuxuu ka raqiisan yahay iska caabin koronto ama kan gaaska keydiya ee biyaha kululeeya.

### Wax badan ka ogow

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, ama aad u baahan tahay tarjumaad, booqo

homes.vic.gov.au/how-do-i-use-my-new-appliances

wac **13 11 72** ama iimayl ugu dir **energyefficiencyprogram@homes.vic.gov.au**

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Gobolka Victoria, Homes Victoria, bisha Juun 2025. Daabacaad ay maamusho Finsbury Green (HV021324)